



The Transitional Federal Government of the Somali Republic
Office of the Prime Minister

Ref: XRW/War-Saxaafadeed.016/07/11

Date: 30 July 2011

Shir Jaraa'id

Hay'adda Maareynta Musiiibooyinka

(Muqdisho, 30ka July 2011): Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya Dr Cabdiweli Maxamed Cali Gaas isagoo ka duulaya baahida deg-degga ah ee loo qabo maareynta musiiibooyinka iyo waajibka dowladda ka saran dadka dhibaateysan ee abaaraha ku dhufteen iyo barakacayaasha aan xadka laheyn eek u soo qulqulaya magaalada Muqdisho.

Ra'iisul Wasaaraha isag oo qiimeeyey xaaladda macluuleed ee gobolada dalka ka jirta iyo talo soo jeedintii guddigii abaaraha ee heer wasiir ee ahaa in la sameeyo Hay'ada Maareynta Musiiibooyinka.

Ra'iisul Wasaarahu waxuu go'aamiyey in la howlgeliyo Hey'adda Maareynta Musiiibooyinka, isagoo u magacaabay shaqsiyaad karti, aqoon iyo waayo aragnimo u leh howlahan baaxadda leh, isla markaana sumcad ku leh bulshada dhexdeeda, ayuu Ra'iisul Wasaarahu magacaabay hay'ad madaxbannaan oo qaabilsan gurmada abaaraha, fatahaadaha iyo musiiibooyinka kale waxaana loo magacaabay:

1. **Cabdullaahi Maxamed Shirwac – Madaxa Hey'adda**
2. **Jamal Maxamed Barrow – Ku xigeenka Barnaamijyada**
3. **Cabdixakiin Axmed Guuleed – Ku xigeenka Maamulka**
4. **Cali Cabdiraxman Axmed – Madaxa Saadka**

Ra'iisul Wasaare Dr Cabdiweli Maxamed Cali Gaas waxuu u rajeeyey guddigan madaxbannaan inay si dhaqsi leh u dar-dargeliyaan howlaha baaxadda leh, una gutaan waajibaadkooda si waddanimo iyo daacad ah oo kalsooni gelineysa shacabka soomaaliyeed.

Shacabka soomaaliyeed waxaa maanta heysta macluul tii ugu xumeyd muddo 60 sano ah, taasoo sababtay roobabkii oo soo daahay iyo kooxaha ka soo horjeedda Dowladda oo hor istaagay shacabka una diiday in gar-gaar iyo gurmada loo fidiyo, tanoo dhalisay in barakacayaal aad u fara badan ay soo gaaraan Muqdisho, iyo xerooyinka Dhadhaab, Ifo iyo Dooow.

Hay'addan Maareynta Musiiibooyinka waa hay'ad madaxbannaan oo shaqsiyaadka maamula ay ka yimaadeen bulshada rayidka ah ujeedaduna ay tahay in gar-gaarka bani'aadanimu uusan marnaba dhexgeli karin siyaasad, oo dowladdu ay dooneyso in dhammaan shacabka soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan la gaarsiiyo gar-gaarka. Hay'adan waxaa looga fadhiyaa inay la yimaadaan qorshe faahfaahsan oo ku wajahan ka hortagga abaaraha, fatahaadaha, iyo musiiibooyinka kale ee la soo gudboonaada shacabka soomaaliyeed.

Xukuumaddu waxey baaq u direysaa beesha caalamka gaar ahaan hay'adha gar-gaarka bani'aadanimu inay si deg-deg ah u soo gaaraan shacabka soomaaliyeed ee ku tabaaleysan waddanka gudihisa iyo xerooyinka qaxootiga ee waddamada deriska ah. Xukuumaddu waxey si gaar ah baaq ugu direysaa Qurbojoogta, ganacsatada iyo shacabka soomaaliyeed inay kaalin mug leh ka qaataan howlaha gurmada abaaraha oo ay la shaqeeyaan Hay'ada Maareynta Musiiibooyinka. Dhammaan Hay'ada Dowladda sida kuwa amniga iyo sharciga waxaa la farayaa inay la shaqeeyaan Hay'adan. - **DHAMAAD** -